Su’aalaha ay badanaa Isweydiiyaan Dadka aan Ingiriiska ku hadlin

Adeegyo noocee ah ayuu adeega Turjumaada Afka iyo Qoraalku Bixiyaan?

Adeega Turjumaada Afka iyo Qoraalka (TIS National) waxay siisaa adeega turjumaada dadka aan ku hadlin Ingiriiska iyo wakaaladaha iyo ganacsiyada u baahan inay la hadlaan macaamiishooda aan Ingiriiska ku hadlin. Adeegyadani waxay awood u siinayaan dadaka aan Ingiriiska ku hadlin inay si madax bannaan u isticmaalaan adeegyada iyo macluumaadka Australiya.

Waxaan la xiriirnaa in ka badan 2400 turjumaan Australiya oo dhan wax ka badan 160 luuqadood oo kala duwan iyo lahjado.

Dadka aan Ingiriiska ku hadlin waxay isticmaali karaan turjumaanada taleefanka isla markiiba iyagoo ka soo wacaya 131 450.

Bedel ahaan, haddii aad si toos ah ula xiriirto ha’yad waxaa laga yaabaa inay kuu balamiyaan turjumaan.

Yaan kala xiriiri karaa TIS National?

Wax ka badan 22 000 oo ah macaamiisha wakaaladaha , oo ay ku jiraan Wasaaradda Socdaalka iyo Dhalashada, way ka diiwaangashan yihiin TIS National. Qaar ka mid ah macaamiisheena kale waxaa ka mid ah:

- Wasaaradda dawlada dhexe iyo gobolada
- Golayaasha xaafada
- Aqoonyahanada caafimaadka iyo daawada
- farmasiiyada
- shirkadaha tasiilaadka
- shirkadaha isgaarsiinta
- adeegyada gargaarka degdega ah
- adeegyada sharciga
- bixiyayaasha adeega bulshada iyo dejinta.

TIS National ma ballan qaadi karto in ha’yada aad u baahan tahay in lala xiriiro inay aqbasho wecitaanada turjubaanku uu caawinayo ee ka imanaya TIS National.

Markee baan wici kartaa TIS National?

TIS National waxay bixiyaa adeegyada turjumaada 24kii saac , iyo maalin kasta oo sannadka ah.

Ha’yadaad la xiriirto waxaa laga yaabaa in la heli karo oo kaliya inta lagu jiro saacadahooda shaqada ee joogtada ah iyo saacadaha shaqadana waxaa laga yaabaa inay ha’yadba ha’yada kale ka duwan tahay.

Ha'yadaha Australiya badidoodu waxay ka shaqeeyaan inta lagu jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah inta u dhaxeysa 9 subaxnimo–5 galabnimo, Isniinta ilaa Jimcaha. Ha'yado badan lama heli doono fasaxyada dadweynaha.

Maxaan fili karaa markaan waco 131 450?

Markaad wacdo TIS National waxaa ku salaami doona xiriiriyaha Ingiriiska ku hadlaya ee TIS National oo ku weydiin doona turjumaan luuqadee ah ayaad u baahan tahay.

Ka dib markaad codsato luuqad, waxaa lagu gelindoonaa khad sugitaan ah inta xiriiriyuhu ka raadinayo turjumaan firaaqaha. Fadlan khadka ku jiran xitaa haddii uusan jirin muusiga sugitaanka.

Haddii la heli karo turjumaan luuqadaada ah, xiriiriyaha ayaa kugu xiriirinaya turjumaanka oo ku weydiin doona hay'adaad dooneysid inaad la xiriirto. Fadlan waa inaad heysaa magaca hay'ada , lambarka xiriirka taleefankooda iyo lambarka macliilka ama xisaabta aad hay'ada ku leedahay (haddii ay jiraan) mid diyaar ah markaad soo wacdo TIS National.

Xiriirayaashu waa inay baaqi ku ahaadaan dhexdhexaadnimo kugumana talin karo hay'ada aad la xiriireyso. Marka lagula xiriiriyo turjumaanka , turjumaanku kulama yeelan doono wada hadal aan toos ahayn adiga maadaama looga baahan yahay inay dhexdhexaad noqdaan dhammaan inta lagu jiro hawshaan turjumaada.

Turjumaanku wuxuu u sheegayaa xiriiriyaha TIS National ee aad u baahan tahay inaad la xiriirto, xiriiriyuhu wuxuu sii wadayaa inuu waco oo uu kugula xiriirinayo iyo turjumaanka hay'ada la codsaday.

Haddii uusan wax turjumaan ahi la heli karin oo luuqadaada ah, xiriiriyaha ayaa ku weydiin doona adiga inaad si dhakhso ah dib noogu soo wacdo. Haddii aad ku hadashid hal luuqad wax ka badan hal luuqad ah waxaad ku dooran kartaa turjumaan luuqad kale.

Maxaan sameeyaa haddii aan aqaan turjumaanka ay igu xiriiriso TIS National?

Haddii aad ogaato inaad taqaan turjumaanka, adigaa iska leh go'aanka haddii aad sii wadaneyso fadhigaas turjumaada .

Haddii aadan dooneynin inaad sii isticmaasho isla turjumaankan, u sheeg xiriiriyaha TIS National ama hay'ada ka dibna wicitaanka jooji.

Ma codsan karaa turjumaan dumara ama rag?

Haa. Haddii aad doorbideyso turjumaan jinsi gaar ah, u sheeg xiriiriyaha TIS National ama hay'ada aad la xiriireyso sida ugu dhakhsaha badan ee suurta galka ah. TIS National waxay iskudeyi doontaa inay ku siiso turjumaanka jinsiga aad codsatay ah.

Ma codsan karaa turjumaan ka soo jeeda diin gaara ama dhaqan?

Maya . xiriiriyayaasha TIS National waxay shaqooyinku ugu qoondeeyaan turjumaanada iyagoo ku saleynaya heerkooda aqoonsi iyo helitaankooda kuma dooran karto turjumaan ku saleysan diin iyo dhaqan.

door bidayaa inaan isticmaalo turjumaanka qof ahaan. Suurtogal ma tahay?

Haa . TIS National waxay bixisaa adeegyada turjumaada oo goobta kuugu imanaya.

Haddii aad u baahan tahay turjumaan goobta kuugu yimaada, waa inaad la xiriirtaa hay'ada aad dooneysid inaad la hadashid adoo u sii maraya TIS National oo isticmaalaya turjumaanka taleefanka. Kadib waa inaad codsataa inay kuu balamiyaan turjumaan goobta kuugu yimaada.

Waxaan doonayaa inaan la xiriiro adeegyada xaalada degdeg ah anoo isticmaalaya turjumaan. Maxaan sameeyaa?

Si aad ula xiriirto adeegyada xaalada degdega ah ee Ambalaasta, Boliiska, ama Dab demiska, waa inaad had iyo goor si toos ah u wacdaa 000.

Khadka adeegyada xaalada degdega ah ee 000 ayaa wici doona TIS National oo kugu xiriirin doona turjumaan iyagoo isticmaalaya khadka mudnaanta ee 24 saac maalintii, toddobada maalmood isbuucii.

Adeegyada TIS National ma u bilaashbaa dadka aan Ingiriiska ku hadlin?

Haa. Badiba adeegyada turjumaanka TIS National waa u bilaash dadkaan Ingiriiska ku hadlin.

Guud ahaan hay'adaad la xiriireyso ayaa aqbali doonta kharashka adeega si ay kuugu ogolaadaan isticmaalka adeegyadooda. Hay'adaha qaarkood dhakhaatiirta caafimaadku waxay xaq u leeyihiin turjumaad bilaash ah iyagoo isticmaalaya TIS National.

Hay'adaha qaarkood waxaa laga yaabaa inaysan ka aqbalin wecitaan TIS National. Si kastaba ha ahaatee haddii aad si toos ah ula xiriirto hay'ada waxaa laga yaabaa inay dib kuugu soo wacaan iyagoo wata turjumaanka taleefanka.

Haddii aad la xiriirto hay'ad aan macmiil u ahayn TIS National oo aysan hay'adu aqbaleynin kharashka adeega waxaad dooran kartaa inaad adigu kharashka iska bixisid. Si aad tan u sameysid , u sheeg turjumaanka iyo xiriiriyahayaga inay kuu abuuraan xisaab TIS National. Waxaad u baahan doontaa inaad siiyo faahfaahinta Credit cark kaaga TIS National si xisaabta laguugu sameeyo.

Waa maxay doorka turjumaanka TIS National?

Doorka turjumaanka waa inuu u turjumo erayada lagu hadlo ee luuqadaada sida ugu saxsan ee suurta galka ah.

Turjumaanadu ma bixiyaan tallo . turjumaanadu waa inaysan weydiin su'aalo aan ka ahayn wuxuu codsaday xiriiriyaha TIS National ama qofkaad la hadlaysid.

Turjumaanada TIS National waxaa xiraya xeer anshax oo adag. Xeerkaas ayaa xukuma dabeecadooda aqooneed. Xeerku wuxuu daboolayaa waajibaad kala duwan oo ay ka mid yihiin:

- dhaqanka aqooneed
- qarsoodi ahaanta
- kartida
- dhexdhexaadnimada
- saxsanaanta
- caddaanta xadadka doorka
- lahaanshaha xiriirka aqooneed
- horumarinta aqooneed
- iskuduubnida aqooneed.

Macluumaad intaas ka badan oo ku saabsan xeerka anshaxa waxaa laga helayaa Machadka Turjumaanada Afka iyo Qoraalka ee Australiya (AUSIT).

Sidee baan u siin karaa natiijo celin TIS National?

Haddii aad jeclaan lahayd inaad bixiso natiijo celin ku saabsan adeega TIS National, turjumaan ama xiriiriye fadlan ka wac TIS National 131 450.

Marka lagula xiriiriyo turjumaan, u sheeg xiriiriyaha inaad jeclaan lahayd inaad bixiso natiijo celin ku saabsan TIS National . natiijo celintaada waxaa lagu duubayaa loona gudbinayaa kooxda khuseysa ee TIS National wixii tixgelin ah.

Sidee baan si wax ku ool ah ugu isticmaalaa turjumaanka?

Waxaad ugu isticmaali kartaa si wax ku ool ah turjumaanka TIS National:

- soo diyaarinta dhammaan macluumaadka aad ugu baahan tahay kulankan ka hor intaadan soo wicin TIS National
- inaad dulqaad yeelato oo aad sugto inuu turjumaanku hadalka ka dhammeynayo ka hor intaadan mar labaad hadlin
- isticmaalida jumlado gaagaaban
- iska ilaalinta isticmaalida hadalka dahsoon ama erayada aan caamka ahayn ee laga yaabo inay dhib badan yihiin in la turjumo
- fahmida doorka turjumaanka
- inaadan weydiin turjumaanka tallo ama inuu adiga kuu doodo
- wargelinta turjumaanka , hay’ada ama TIS National isla markiiba haddii aad dhib ku qabto fahmida turjumaanka.

Ma heli karaa dukumiinti la turjumay iyadoo la adeegsanayo TIS National?

Maya. TIS National ma bixiso adeegyada turjumaada ganacsiga ah.

Wasaaradda Socdaalka iyo Ilaalinta Xadka waxay siisaa soogalootiga iyo muwaadiniinta Australiyaanka ah ee sida joogtada ah u degaya australiaya turjumaada dukumiintiga oo bilaash ah. Si aad wax uga weydiiso adeegan la xiriir bixiyaha Barnaamijka Ingiriiska ee Dadka Waaweyn ee Soogalootiga ah ee xaafadaada (AMEP).

Waxaad ka heli kartaa macluumaad ku saabsan fursadaha kale ee turjumaaneed adoo la xiriiraya Hay’ada Aqoonsi bixinta Qaranka ee Turjumaanada Afka iyo Qoraalka (NAATI).